

XAASHIDA AY KU QORAN  
TAHAY XOGAHA MUHIIMKA AH



Volunteers  
of America®

MINNESOTA AND WISCONSIN

# Fahamka Beddelaad Xaddidaada yar leh

## Gogoldhig

Waxa jira doorashooyin kale oo badan oo aan ka ahayn mas'uliyada ama kormeerka ay dawlada u xilsaartay, taas oo u oggolaanaysa dadka inay siyaalo kala duwan u maareeyaan arrimaha shakhsi ahaaneed iyo kuwa maaliyadeed. Dariiqooyinka go'aan qaadashada ee la taageeray, agabka sida Shaacinta Macluumaadka, iyo taageerada bulshada waxay gaari karaan natiijooyinka la rabo iyada oo aan la helin faragelin maxkamadeed, ilaalinta cilaqaadka iyo madax-bannaanida shakhsi ahaaneed.

## Tusaalooyinka Xulashooyinka Adag ee ka yar Halkii ay ka ahaan Lahaayeen Mas'uul:

### Kaalmada Tignoolajiyada

Hirgelinta aaladaha sida dawooyin qaybiyayaasha, alaarmiga, iyo aaladaha badbaadada si kor loogu qaado madaxbannaanida

### Wakiilka Idman ee qofka ka caawiya Dhaqaalaha

Fududeynta codsiga iyo dayactirka faa'iidooyinka iyadoo lagu hadlayo magaca qofka

### Go'aan gaarista Qofka Laga Caawiyo

Go'aannada si wadajir ah ula gaarista qofka, qoyska, iyo daryeel-bixiyayaasha, hubinta caddaynta iyo madaxbannaanida

### Daryeel ama Maareynta Kiis

Qiimaynta baahiyaha, isku xidhka adeegyada, iyo hubinta helitaanka waxyaabaha daruuriga ah sida cuntada, hoyga, iyo gaadiidka

### Shaacinta Xogta

Siinta oggolaanshaha taageerayaasha si ay ula xiriiraan bixiyayaasha daryeelka caafimaadka iyadoo ka wakiil ah qofka

### Ballanqaadka Madaniga ah

Xaaladaha dhibaatooyinka caafimaadka dhimirka, ballanqaadka madaniga ah ayaa laga yaabaa inuu lama huraan noqdo bilowga, oo ay ku xigto Dardaaranka Cilmi-nafsiga ee Hore ee daryeelka dhibaatooyinka mustaqbalka

### Guddiyada Anshaxa/Siyaasadaha Xarunta

Isticmaalka guddiyada anshaxa gudaha ama siyaasadaha hay'adaha si loo gaaro go'aannada marka aysan jirin wakiil sharci ah

### Maareynta Maaliyadda

Dejinta habab aad ku sii wadato lacag bixinta guryaha, yutiilitida, iyo adeegyada

### Aalada Health Care Directive

Magacaabista wakiilka daryeelka caafimaadka ama diiwaangelinta dookhyada caafimaadka ee go'aannada mustaqbalka

### Tusaalooyinka Xulashooyinka Adag ee ka yar Halkii ay ka ahaan Lahaayeen Kormeere maxkamada u xilsaartay:

#### Go'aan gaarista Qofka Laga Caawiyo

Ka caawinta go'aamada maaliyadeed, habaynta waraaqaha, iyo ilaalinta lacagaha biilka

#### Aaladaha Bangiga

Ka faa'iidsiga aaladaha sida lacag ka jarashada akoonka, bixinta biilka tooska ah, iyo dadka akoonka gacanta ku hayo si ay lacagta u bixiyaan

#### Wakiilka Idman ee qofka ka caawiya Dhaqaalaha

Shakhsi loo magacaabay inuu ilaaliyo oo sugo dheefaha daryeelka caafimaadka iyo adeegyada degmada

#### Wakiilka Lacagta ka baxiyo

Qof lagu kalsoon yahay oo ay magacawday Maamulka Sooshiyaal Sekiyuuritiga si uu u helo oo uu u maareeyo dakhliga kharashyada lagama maarmaanka ah

#### Awoodda Qareenka

Magacaabista shaqsi lagu kalsoon yahay si uu u maamulo dhaqaalaha, maalgashiga, iyo lacagaha biilka oo leh hagitaan sharci ah

#### Xasuusin

Sharcigu wuxuu u baahan yahay in la isku dayo doorashooyin xaddidan ka hor inta aan la dooran mas'uuliyadda ama kormeeraha ay maxkamadda u xilsaartay.

### Waxyaabaha Muhiimka ah:

Waxaa jira siyaabo badan, keligiis ama la isku daray, oo lagu daboolayo qofka baahidiisa shaqsi iyo mid maaliyadeed iyadoon loo baahnayn mas'uulka ama kormeeraha ay maxkamadda u xilsaartay. Wax kasta oo daryeel-bixiyayaasha, xubnaha bulshada, iyo qoyska iyo saaxiibada ay sameeyaan si ay uga caawiyaan go'aan gaarista si ay u helaan baahiyahooda gaarka ah iyo daryeelka iyo baahida loo bixiyo waa guul. Tani waxay la macno noqon kartaa ku biirista wada xaajoodyada ku saabsan go'aamada qofka iyo bixiyayaasha, tagitaanka ballamaha si wadajir ah, isticmaalka foomamka xog-wadaaga, iyo caawinta u helida macluumaad ama ilo faa'iido leh. Istimalka beddelaad yar oo xaddidan waxay gaari kartaa in badan oo ka mid ah waxa ay dadku rajeynayaan inay qabtaan inkastoo mas'uuliyadda aysan jirin faragelin maxkamadeed, hoos u dhigista kharashaadka iyo ilaalinta xiriirka. Tan ugu muhiimsan, waxay awood u siinaysaa qofka inuu sii haysto xuquuqdiisa aayo-ka-tashiga.

### Wixii Kaalmo Dheeraad ah

Wixii macluumaad dheeraad ah ama la tashi ah, fadlan la xiriir ilaha VOA ee soo socda:

Center for Excellence oo  
la Iskaga caawiyo Go'aan  
Gaarida

☎ **Khadka Laga helo Xogaha Daryeelka Ilmaha:** 952-945-4174 (khadka lacag la'aanta ah 844-333-1748)

✉ **Iimayl:** cesdm@voamn.org

🌐 **Websaydka:** www.voamnwi.org/cesdm

